

## Warbixinta Xuquuqdaada iyo Masuuliyadaada sidii Ka qeyb qaate WIC

1. Heerarka u qalmidda iyo ka qeybqaadashada waa isku mid qof kasta iyadoon loo fiirin, qolo, midab, asal dhalasho, da', jinsi ama naafonimo.
2. Laga yaabe inaan racfaan ka qaato go'aanka ay gaaraan WIC ee la xiriira Cunugeyga ama u qalmideeyda.
3. Waxaan heli doonaa macluumaad nafaqo iyo gudbinno adeegyadda caafimaad. Waa leygu dhiiri geliyay inaan ka qeyb qaato adeegyadaan.
4. Waxaan heli doonaa tusaalooyin sida loo isticmaalo jeegaga WIC.
5. Waan illaalin doonaa ballannadeyda WIC. Haddii aan ku guul dareysto inaan soo qaato jeegaga WIC seddex (3) bilood oo isku xiga, waa leyga tiri doonaa Qorshaha.
6. Waxaan ka qeyb qaadan doonaa oo keliya hal faydhawr WIC markiiba. Waan fahansanahay in ay sharci darro tahay in laga tirsanaado in ka badan hal faydhawr isla markiiba, ama Pennsylvania ama dowladaha kale. Helitaanka jeegaga faydhawradda WIC ama laba dowlad muddada isla bishaasi waxay I dhaxalsiineysaa ka mamnuucid Qorshaha.
7. Ka qeybqaataha ee iibiya ama bedesha si shaqiyeed u gata (kuma gadanaayo jeeg WIC) cunto ama qaabab u eg cuntadda ama qaababka loo qoray iyaga Qorshaha WIC waa inuu haystaa rsiidyadda iibsiga ee qalabyadaas I uu ugu lifaaqo codsiga Qorshaha WIC in aysan iibineynin ama ku bedelaneynin cunto ama qaabab ay siisay Qorshaha WIC.
8. Waxaad xaq u leedahay inaad xareeyso eed sheegid lid ku ah seyladda tafaariiqda adoo la xiriiraayo Xiriiriyaha Wakaaladda Seyladda Tafaariiqda. Waad dooran kartaa inaad magacaaga isticmaalin.
9. Dhammaan ka qeyb qaatayaasha/u ololeynta iyo dadka awoodda u leh u qalmidda waxaa lagu difaacay qodobka hoose ee ADA ama Qeybta 504. Haddii aad dareento in xuquuqdaadii lagu xadgudbay waxaa xaq u leedahay inaad xareeyso eed sheegasho. Haddii aad qabto su'aalo la xiriira difaaciddaan ama sida loo xareeyo eed sheegad, kala xiriir xiriiriyaha wakaaladda dowladda

Waan aqriyay xuquuqdeyda iyo masuuliyadaha. Waxaan dhaaranaa in macluumaadka aan siiyay WIC ay sax yihiin inta ugu fiican ee aqoonteya. Foomkani waxaa lagu gudbiyay isagoo ku xiran rasiidyadda gargaarka Federaalka. WIC laga yaabee inay xaqiijiso macluumaadka uu xambaarsan yahay foomkan. Waan fahansanahay in bixinta been ama marin habaabin aan habooneyn igu soo laabaneyso. Xittaa, Waxaan udan doonaa raaciyad ama makamad dembiile hoos iaaneyso sharciga Dowlada Federaalka. Waan fahansanahay in Xoghayaha Caafimaakainuu ogolaan karo sii deynta macluumaadka ee aan anigu siiyay WIC mashruucyo kale sida CHIP, Gargaarka Caafimaad, SNAP, Quraacda Dugsiga iyo Qadada Dugsiga. macluumaadkaan waxaa loo isticmaali karaa oo keliya ku illaalinta u qalmideyda ee mashruucyadaan iyo kuwa gaarsiinta. Waxaan fahansanahay in faylkeyga ama cunugeyga faylkiisa dib u eegi karo qeyb seddexaad (aan aheyn WIC) imtixaane sida qeyb ka ah imtixaane sannadeedka WIC. Dhammaan macluumaadka waa qarsoodi.

Waxaan cadeynayaa inaan helay, aqriyay ogolaadayna inaan raaco Xeerarka Qorshaha WIC.

Somali-WIC Rights and Responsibilities